sawirrada: www.canva.com

Euroopan unionin osarahoittama



# Talooyin ku saabsan cadayashada ilkaha

SOMALI

## JOOGTEYN



Ilkaha waa in la cadayo subaxdii iyo fiidkii.

Ilkaha waa in la cadayo 2 daqiiqo mar kasta.

Ilmuhu waa inuu yeeshaa burush ilko oo ku habboon da'diisa.

## AAN WADA CADAYNO



Isla mar cadaysta ilkihiinna.
U muuji ilmaha sida loo cadaydo!

Waad u oggolaan kartaa ilmaha inuu marka hore cadayo ilkahaaga. Markaas kadib wuxuu u fududaan karaa inuu aqbalo cadayashada ilkihiisa.

Ka dhiga cadayashada ilkaha waqti wadajir ah oo xiiso leh.

## AAN EEGNO ILKAHA



Baar oo baro ilkahaaga adigoo isticmaalaya muraayad. Immisa ilko ayaa aragtay?

Ilmaha waxaa u fududaan karta inuu aqbalo in burushka afka la geliyo haddii uu ka arko muraayadda dhexdeeda.



## SAACAD



Waxaad tijaabin kartaa saacadaha tirinaya waqtiga, si ilmuhu ugu fududaato inuu arko inta daqiiqo ee haray.

Tusaalooyin:
Aadaalaha Vegemi, Aadaalaha Time mouser

## JIRITAAN FIICAN



Imuhu ma ku jiraa jago raaxo leh?

Miyuu fiican yahay inuu istaago mise fadhiisto marka la cadayanayo?

## HEESO IYO GABAYO



Isku day in aad si wadajir ah u samaysataan gabay ama hees yar oo ku saabsan ilkaha oo baxsha jeermisyada ilkaha.

YouTube-ka waxaad ka heli kartaa heeso diyaarsan oo ku saabsan cadayashada ilkaha.



JOOGTEYN

DULQAAD

JAWI FARXAD LEH

Tampereen ammattikorkeakoulu

Pirkanmaan hyvinvointialue

TAMPERE